



Burlington Electric Department, qiime ayuu noogu fadhiyaa qof kasta oo macmiilkayaga ah. Waanu fahamsanahay in mararka qaar macaamiishayadu ay dhibaato kala kulmaan bixinta qaamaha korontada. Si aanu kaaga caawino inaad fahamto hannaankayaga qaansheegadka iyo ka jarista, waxaanu isku soo ururinay liiska su'aalaha badanka la iswaydiiyo.

Waa maxay qaanta korontadu?

Qaanta korontadu waa codsi bixinta lacagta korontada ee qoyskaagu isticmaalo 30 maalmood oo kasta.

Waa maxay wareeggayaga lacag-bixinta qaansheegadka?

Burlington Electric waxay diirtaa qaan dhammaadka bisha si ay u codsato in la bixiyo lacagta 30 maalmood (1 bil) oo adeeg ah. Lacag-bixinta waxa la rabaa marka aad hesho qaanta. Lacagtu waxay ku taala qaybta "Total Amount Due" (Lacagta Taagan) ee qaanta.

Sidee ayaan u bixin karaa qaanta?

Waxaanu aqbalnaa lacag cad, jeeg, moni ordha, kiridhit kaadh ama dhibit kaadh in lagu bixiyo.

Burlington Electric waxay leedahay dhawr siyaabood oo aad u bixiso qaantaada. Waxaad bixin karta qaanta adiga oo booqanaya xafiiskayaga oo ku yaala 585 Pine Street in Burlington. Sidoo kale waxaanu leenahay daaqadda baabuur ku imaanshaha, taasi oo kuu oggolaanaysa inaad bixiso lacagta adiga oon baabuurkaaga ka tagin.

Waxaad soo dhigi kartaa lacag-bixintaada (jeeg ama moni odha) boosta, adiga oo isticmaalaya galwaraaqeedka soo celinta ee qaantu kuugu timi.

Waxaad dhigi kartaa lacag-bixintaada mid kamid ah sanduuqyadayada ku ridista si aad u bixiso qaantaada, xiitaa marka xafiisyadayadu xidhan yihiin ee aad rabto inaad bixiso lacagta. Fadlan lacag cad ha dhigin sanduuqyadayada ku ridista.

Sidoo kale waxaad isticmaali kartaa sanduuqyada ku ridista ee goobaha soo socda:

City Hall, (irrida Church Street)

Burlington Electric Department (sanduuqayaga ku ridistu wuxuu yaala meesha ku xigta daaqadda baabuur ku imaanshaha)

Burlington Electric Department
585 Pine Street Burlington, VT 05401
burlingtonelectric.com

Phone 802.658.0300

Waxaad lacagta ku bixin kartaa marka adigu aad socoto adigoo adeegsanaya lacag cad ama jeeg:

TD Banknorth, located on 111 Main Street, ee Burlington

Hannaford's Supermarkets (North Avenue ee Burlington iyo Dorset Street ee South Burlington)

Waxaad ku bixin kartaa qaantaada onlayn adiga oo booqanaya websaytkayaga.

Waa maxay ogaysiiska ka jaristu?

Kadib 30 maalmood, xisaabtaadu waxay noqotaa muddo-dhaaf waxaanad heli kartaa ogaysiis ka jaris oo cas oo muujinaya in adeeggaaga la jari doono marka la gaadho ama kadib taariikh cayima, ilaa aad iska bixiso qaantaada mooyaane, ama aad qabanqaabisay inaad lacagta na siiso.

Maxay tahay inaad samayso haddii aad hesho ogaysiiska ka jarista?

Haddii aad heshay ogaysiiska ka jarista oo aanad awoodin inaad bixiso lacagta, fadlan ha argagixin. Waanu ku caawin karnaa, haddii aad wacdo Waaxdayada Adeegga Macmiilka, 865-7300. Waxaanu rabnaa inaanu kaa caawino inaad kahortagto kala-go adeeg.

Maxay tahay inaad samayso haddii aanad bixin karayn qaantaada?

Haddii aanad bixin karayn qaantaada, fadlan wac Waaxda Adeegga Macmiilka 865-7300.

Wakiiladayada adeegga macmiilku waxay kaa caawin karaan inaad bilawdo qabanqaabada in adeeggaagu kuu sii shaqeeyo.

Wakiiladayada adeegga macmiilku waxay sidoo kale kaa caawin karaan inaad bilawdo qorshe miisaaniyadeed lacag-bixin marka la eego qaamaha mustaqbalka. qorshe miisaaniyadeed lacag-bixintu wuxuu u saamaxaa macaamiisha inay bixiyaan lacag isku mid ah bil kasta muddo 12 bilood ah. Qorshahan sidoo kale wuxuu ka caawin karaa macaamiishayada inay ka dheeraadaan helitaanka ogaysiisyada ka jarista ee ay keentay lacagta qaanta ee hadhaysa bil kasta.

Ka waran haddii aanad bixin kari waayo qaanta kululaynta xilliga jiilaalka?

Haddii aad u baahan tahay caawimo bixinta lacagta kululaynta ama korontada inta lagu jiro bilaha jiilaalka ee qabow, waxaad dalban kartaa maalgalinta kaalmada shidaalka. Si aad u hesho caawimo, waa inaad buuxiso dalab oo la oggolaado.

Si aad u hesho dalab, fadlan wax lambarrada soo socda:

Barnaamijka Kaalamda Tamarta Guriga ee Waaxda Daryeelka Bulshada: (800) 479-6151

Age Well (oo ah barnaamij caawiya macaamiisha ka wayn 60 jir): (802) 865-0360

Hay'adda Aagga Champlain ee Gabowg: barnaamijka DIIRIMAAD (802) 863-6248

Goorma ayey tahay inaad Waco adeegga macmiilka?

Haddii aad su'aalo qabto kusaabsan qaantaada, fadlan wac wakiiladayada adeegga macmiilka (802) 865-7300 si ay kaaga caawiyaan su'aalaha wixii qaansheega.